

**FOURTH JUDICIAL DISTRICT**  
**(Maxkamadda Deganka Afraad)**

**HOUSING COURT**  
**(MAXKAMADDA GURYAHA)**

**KIREEYE - SIDEED U DIIWAAN GELIN LAHAYD**  
**MARKA AAD RABTO IN AAD QOF GURIGAAGA**  
**DEGGAN KA SAARTO**

**TALAABO SI SHARCI AH QOF GURIGA LOOGA SAARAYO (Eviction Action)**

Waa talaabo sharci ah, taasoo kireeye uu diiwaan geliyo codsi uu maxkamadda kaga codsanayo in ay go'aan ka gaarto in kirayste si sharci ah guriga looga saaro ama in uu xaq u leeyahay in uu guriga ku jiro.

**SABABAHA KEENA IN LA CODSADO IN QOF GURI SI SHARCI AH LOOGA SAARO**

- Kirada oo aan la bixin (tan ugu badan)
- Qofka oo aan guurayn ka dib markii uu helay ogaysiis ku haboon ama markii uu dhamaaday wakhtigii Heshiiska kirada
- La buriyo heshiiska (caqdiga) iyadoo lagu bedelaayo heshiis guriga cid kale kula wareegtay
- Daynta guryaha loo qaato oo aan la bixin waayay awgeed loola wareegayo.
- Heshiis Kiro oo lagu xadgudbay – ay ka mid tahay wax daroogo la xiriira

**SIDEE KIREEYE U DIIWAN GELIYAA (U CODSAN KARAA) DACWAD AH**  
**IN SI SHARCI AH QOF GURI LOOGA SAARO ?**

**Yaa dacwadda codsan kara?**

- Hantiilaha guriga; ama
- Qareen wakiil ka ah hantiilaha ;ama
- Qof wakiil ka ah hantiilaha oo diiwaan geliya; ama
- Qof hantida yeelan kara; ama
- Qof hantiile uu siiyay wakiilasho sharci ah (Power of Attorney)
- Wakiiladu ma noqon karaan xer beegti (jury trial) ama dacwad racfaan (Maxkamadda Racfaanka) ama Maxamdda Sare (Supreme Court)

### **Nidaamka Diiwaan Gelinta:**

- Dacwadda asalka ah diiwaan geli xarunta adeega dadweynaha ee dabaqa hoose (Public Service Level (PSL).
- Haddii uu jiro heshiis kiro oo qoran, koobi ku lifaaq dacwadda.
- U diyaari nuqul dacwadda ah qof kasta oo dacwadda ku magacaaban iyo hal nuqul o dheeri ah dheeri ah.
- Laga bilaabo July 1, 2005 lacagta lagu diiwaan gelinayaa waa \$252.00, oo jeega loo qorayo **District Court Administrator (Maamulaha Maxkamadda Degmada).**

### **U HOGAANSAMIDDA MINNESOTA STATUTE 504B.181 (SHARCI)**

Minnesota Statute 504B.181 (Xeerka Minnesota 504B.181) wuxuu waajibinayaa in kireystaha qoraal lagu ogaysiiyo warbixinta soo socota iyo in isla warbixintaa lagu dhejiyo meel la arki karo oo guriga ah waxaana ka mid ha:

- Magaca, cinwaanka maamulaha sharciga ah ee guriga;
- Magaca, cinwaanka hantiilaha guriga ama wakiilka sharciga ah oo kirada u qabta oo mas'uulka ka ah ogaysiisyada iyo dalabyada;
- Qoraal cadeynaya u hogaansanaantaada sharciyada ku qoran foomka.
- Waa in aad u hogaansataa sharciga ama dacwaddaada waa la tuurayaa illaa aad keeni karto cadeyn muujinayso in koreystuhu ogosoonaa qiyaastii ugu yaraan 30 cisho ka hor inta aadan dacwaddan diiwaan gelin.

### **SIDEE BUU KIREEYE U BUUXINAYAA FOOMKA DACWADDA?**

- Tilmaamo aad u wanaagsan oo ku saabsan sidii loo buuxin lahaa foomka laguna codsanaayo talaabo si sharci waaqfaqsan qofka looga saari lahaa guriga waxaad ka heli kartaa xoghaynta maxkamadda.
- Qor qiyaastii maalinta kirayste uu saxiixay heshiiska guri ama uu degay guriga.
- Qor cinwaanka guriga oo buuxa, oo ay ka mid yihiin wax kasta oo lagu aqoonsanayo.
- Qor mudada iyo qodobada uu ka kooban yahay heshiiska guri ama haddii hashiiska guri yahay “bil-ka-bil”
- Caddee xiriirka sharci ah ee ka dhexeeya hantiilaha guriga iyo qofka dacwadda u saxiixaya.
- Muuji in aad raacday xeerka Statute 504B.181.
- Sheeg sababaaha aad u doonayso in kirayste si sharci ah guriga looga saaro.

## **WICITAANKA MAXKAMAD (THE SUMMONS)**

- Wicitaanka maxkamadda waa ogaysiis sharci ah, qoran oo ku wargelinaya dacwad ka jawaabaha (kirayste) in la bilaabay talaabo maxkamadeed oo dacwadda lagu dhegaysanayo maalin gaar ah. Waxayna kaloo u sheegaysaa in haddii jawaabe uusan ku raacsanayn talaabada ama uu rabo in uu sheekada dhankiisa sheego, iyadu/isagu waa in uu maxkamadda yimaadaa wakhtigaas.
- Markii dacwadda la dhamaystiro, xoghaynta maxkamadda wuxuu diyaarinayaa maxkamad ka dalbid iyo dhawr koobi. Koobiyada waxaa la siinayaa qofka dacwadda soo qortay (dacwoode/codsade).

## **U DHIIBIDDA/SIINTA WICITAANKA MAXKAMAD**

### **Adeeg Toos Loogu Dhiibayo**

- Qof saddexaad oo aan dacwadda ku lug lahayn ayaa si toos ah ugu dhiibi karta wicitaanka maxkamad (summons) jawaabaha ugu yaraan 7 maalmood ka hor maalinta maxkamadda.

### **Adeeg Qof Kale Ugu Dhiibaya**

- Qof saddexaad oo aan dacwadda ku lug lahayn ayaa geynaya wicitaanka maxkamadda (summons) baa koobi maxkamad ka dalbidda ku dhaafi kara qof kale oo mas'uul ah oo la nool jawaabaha.. Qof kaas ayaa markaa mas'uul ka ah in uu u gaarsiiyo wicitaanka maxkamad.

## **WARBIXIN KU SAABSAN ADEEGGA DHIIBIDDA**

- Dacwoode UMA dhiibi karo wicitaanka maxkamad (summons).
- Adeegga dhiibidda wicitaanka maxkamad waa uu noqdaa ugu yaraan todoba (7) maalmood ka hor maalinta maxkamadda.
- Wicitaanka Maxkamad LOOMA dhiibi karo maalin ah feesto sharci ah.
- Waa in qoraal maragkac ah (affidavit) oo ku saabsan in la dhiibay wicitaanka maxkamadda laga diiwaan geliyaa saddex (3) maalmood oo ah maalmo shaqo ka hor maalinta dhageysiga dacwadda.

## **WICITAANKA MAXKAMAD OO BOOSTA LAGU DIRO**

**Boostadu waa nooc ka mid ah adeega loogu dhiibayo wicitaanka maxkamadda** markii aan jawaabaha loogu dhiibi karin si toos ah ama qof kale taasoo ugu yaraan laba goor la isku dayay oo ah maalmo kala duwan labadaa goor oo ugu yaraan midkood la isku dayay saacadaha u dhexeeya 6:00 fiidnimo iyo 10:00 fiidnimo.

**Taalaabooyinka soo socda oo dhan waa ay noqdaan ugu yaraan 7 cisho ka hor dhegaysiga.**

- Qareenka dacwoode ama dacwoodayaal baa boosta ugu diraaya koobi ah wicitaanka maxkamadda (summons) iyo dacwadda cinwaankii ugu dambeeyay ee la yaqiin ee uu jawaabahu deganaa.
- Qofka samaynaya adeegu waa in uu ugu yaraan 2 goor isku dayay in uu u dhiibo meesha cinwaanka uu deganaa. Isku daygaasu waa in uu ahaadaan maalmo kala duwan, oo mid ka mid ah isku daygaas u dhexeeyo 6:00 fiidnimo iyo 10:00 fiidnimo.
- Qofka samaynaya adeegu waa in uu buuxiyaa Qoraal maragkac ah oo cadeynaya in aan la helin (notorized Affidavit of Not Found).
- Qareenka dacwoode ama dacwoodayaal waa in uu buuxiyaa qoraal maragkac ah oo uu sameeyay dacwoode (notorized Affidavit of Plaintiff) (oo sheegaysa in la waayay jawaabaha).
- Qareenka dacwoode ama dacwoodayaal oo wicitaanka maxkamadda boostada ugu diray in uu dhamaystiraa qoraal maragkac ah in uu boostada ugu diray (notarized Affidavit of Mailing).
- Qoraalka maragkaca ah in aan la helin, Qoraalka maragkaca ah oo uu sameeyay dacwoode, iyo Qoraalka maragkaca ah in boosta loogu dirray waxaa laga diiwaan geliyaa Maxkamadda.

**Ka dib markii la dhamaystiro talaabooyinka oo qoraalka ah maragkaca ah (Affidavits) la diiwaan geliyo, markaa:**

- Qofka samaynaya adeegu wuxuu Wicitaanka iyo cabashada Maxkamadda (Summons and Complaint) ku soo dhejinayaa meel ka mid ah daarta/guriga oo si sahal ah loogu arki karo. Sidaan waa in la sameeyaa ugu yaraan todoba (7) cisho ka hor maalinta dhegaysiga dacwadda.
- Qofka samaynaya adeegu waa in uu dhamaystiraa qoraal maragkac ah in uu dhejiyay. Tan waa in laga diiwaan geliyaa Maxkamadda ugu yaraan saddex (3) cishod oo ah maalma shaqada dhegaysiga ka hor.

**GOORMAA LA DHAGAYSIGA DACWADAHA  
SI SHARCI AH QOFKA GURIGA LOOGA SAARAYO?**

- Maxkamadda Guryuhu waxay qabataa jadwalka qof si sharci ah guri looga saarayo (eviction) Talaada illaa Jimcha waxayna ku qabataa xarunta dawladda.
- Marka la diiwaan gelinaayo dacwadda ayaa la qabtaa maalinta dawladda la dhegaysanayso, dhegaysigaasuna wuxuu dhacaa 14 maalmood gudahood maalinta la diiwaan geliyo.

**XAGGEE BAA LAGU QABTAA DACWADAHA**  
**SI SHARCI AH QOF GURI LOOGA SAARAYO?**

Dhegaysiga dacwadaha guryaha oo dhan waxaa lagu qabtaa Xarunta dawladda ee Degmada Hennepin, 300 South 6th Street, Minneapolis, Minnesota. Talaabo si sharci ah qof guri looga saarayo waa in laga diiwaan geliyaa Xarunta dawladda ee Degmada Hennepin. Wixii talaabo ah oo ka imanaaya kirayste oo dhan (heshiis kiro oo qof kale u dhexeeyo, loo shaqeeyo oo shaqaalaha ka xirta goobta shaqada, iwm) waa in dhamaan laga diiwaan geliyaa xafiiska magaalada hoose.

**CODSI TURJUBAAN**

Haddii aad dhegaysiga maxkamadda u baahantahay turjubaan, horay maxkamadda u wac. Guud ahaan maxkamaddu waxay u baahan tahay 48 saac ka hor in la ogaysiiyo in turjubaan loo baahan yahay. (612-348-5186)

***QAANSHEEGASHADA KIRADA***

Dacwooyinka kirada iyo lacagaha kale ee ka yar \$7,500.00 waxaa laga heli karaa Maxkamdda wax Dhexdhexaadisa oo lagala xiriir karo 612-348-2713. Dacwooyinka lagu kala dacwoonayo wax ka badan \$7,500.00 waa in laga diiwaan geliyaa Maxkamdda Degmada, Diiwaan Gelin Dacwooyinka Madaniga ah oo lagala soo xiriiri karo (612) 348-3164.

**OGAYSIIIS SI SHARCI AH OO QOF GURI LOOGA SAARAYO –**

**(Amar Maxkamadeed oo daar/guri qofkii lahaa ku soo ceshanayo iyo Amarka ka bixitaan)**

Amar Maxkamadeed oo daar/guri qofkii lahaa ku soo ceshanayo iyo Amar ka bixitaan waa ogaysiis sharci ah oo jawaabaha ku amraya in uu ka guuro rugta/goobta dacwaddan lagaga hadlay. Waxaa amarkaa la soo saari karaa oo kali ah ka dib markii uu kireeye ku guulaysto talaabo si sharci ah qof looga saarayo guri.

Amarkaa maxkamadeed ( Writ ) waxaa laga soo qaadan karaa A1700 ee Xarunta dawladda. Si aad u hesho waxaad bixinaysaa \$40.00.

Sarkaalka amniga qaabilsan (sheriff) waa in uu u dhiibaa ogaysiiskan qofka. Haddii sarkaalka amnigu uusan qof ahaan u dhiibi karin digniintan, waxa uu ku dhejin karaan meel la arki karo oo ku taal rugta/goobta dacwaddan lagaga hadlay.

Kiraystuhu wuxuu haystaa 24 saac in uu kaga guuro daarta.

Haddii jawaabe (kirayste) uusan u hogaansamin ogaysiiskan, la socodsii shariifka oo wac 612-348-3800.

Wixii warbixin dheeraad ah tixraac Minnesota Statute Annotated (M.S.A.) 504B.365 oo ah *Sharci ku saabsan qof hantidiisa si sharci daro ah loo haysto ama laga saaray; qaaditaan talaabo sharci ah oo hanti lagu soo ceshanaayo*)

**MEELO AAD WARBIXIN KA HELI KARTO**

**Legal Aid Society of Minneapolis:**

**(Jamciyadda Minneapolis ee**

**Caawinaadda Sharciga)**

612-334-5970

**Volunteer Lawyer's Network:** 612-752-6677

**(Isku xirka Qareenada iskaa wax u qabso**

**ku shaqeeya)**

**Minnesota Tenants Union:** 612-871-7485

**(Ururka Kiraystayaasha Minnesota)**

**District Court Housing:** 612-348-5185

**(Maxkamadda Guryaha ee Degmada)**

**Lawyer Referral Service:** 612-752-6666

**(Adeegga kuu Sheega Qareenada)**

**Minneapolis Inspections Department:**

**(Waaxda Kormeerka Minneapolis)**

612-673-5858

**Department of Economic Assistance:**

**(Waaxda Kaalmada Dhaqaalaha)**

612-348-3400

**Minnesota Multi-Housing:** 952-854-8500

**Tel Law:** 612-334-5970

**(Tel Sharciga)**

**Sheriff:** 612-348-3800

**HOME Line-Suburban Housing**

**Advocate:** 612-728-5767

**Ogow:** Warbixinta ku saabsan kiisaska Housing Court (Maxkamadda Guryaha) waxaad ka heli kartaa meelaha combutaradu yaaliin ee u furan dadweynaha oo ku yaal Public Service Level/Skyway Level iyo A1700 ee Government Center. Taleefanka magacya laguma raadin karo.